Hagaha guryeynta qaxootiga jooga Scotland

Waxyeelaynta jinsiyadda

Waraaqda 4 – December 2010

Somali

Hooyga aad ku jirtaa nooca u doona ha ahaadee, adiga iyo qoyskaaguba xaq baad u leedihiin in halkaa aad ugu noolaataan si badbaado ah iyo idinkoo aan ka baqayn daandaansi iyo cabsiin ama gaboodfal. Haddii qof u six un kuula dhaqmayo jisiyadaada, midabkaaga, qabiilkaaga ama dalka aad ka soo jeedo awgeed, xaashiyahani waxay kuu sheegayaan waxa aad ka yeeli lahayd.

Waa maxay cabsiinta jinsiyadda ku salaysani?

Cabsiinta jinsiyadda ku salaysan waa dambi daran, oo sharci darro ah. Wuxuu dhacaa marka qof ama dad badan oo ka soo jeedo koox oo isku jinsiyad ah ay, ku gafaan, diiqadeeyaan ama ay cabsi geliyaan qof ka soo jeeda jinsiyad kale. Waxa yeelan kartaa qaabab badan, oo ay ku jiraan:

- Gaboodfal afka ah, sida magac isku isku bixinta/yeedhidda, cayda ama kaftan iyo iska maadsi jinsiyad ku salaysan;
- Waxyeelayn hantidaada ama guriga;
- Qoraalo isirku caayida ah oo meelahaa lagu qoro;
- Ku daadinta qashinka gurigaaga dibaddiisa ama aad raaciso qashin qubka;
- Wicitaano tilifoon oo arbushaad ah, qoraalo ama emailo;
- bullying, intimidation and threats; or
- Gaboodfal oogo ama gacan ka hadal.

Ma iska dhaafaa?

Maya. Qof kastaa xaq buu u leeyahay in u nabadgelyo ku noolaado isagoo/iyagoo aan baqayn weerar, qoysaskooda, hantida iyo guryaha. Haddii waxba samayn weydo, waxa laga yaabaa in ay ka sii darto, sidaa awgeed way fiican tahay in markiiba ama hore wax looga qabto.

Maxaan sameeyn karaa?

Ma aha inaad iska aamusnaato. Haddii aad u malaynayso in danbiga lagu geystay uu ku sal leeyahay midab takoor markaas waa in ay u arkaan sidaas, booliiska iyo hayahada kaleba. Waxaa jira waxyaabo fara badan oo aad sameeyn karto iyo waxaa jira caawinaado fara badan oo diyaar ku ah.

- **La xidhiidh bilayska**

  Waayo meel ka dhaca isireed waa dambi xun, waxa ugu horeeya ee aad samaynaysaa waa la xidhiidhka bilayska, oo badhi doona meel ka dhaca iyo shilka isireed. Waa sharci darro, dadka galena maxkamadda ayaa la geynayaa. Bilaysku si adag ayuu arrintan u waajahayaa, sidaa daraadeed ha baqan.

  Haddii aad khatar dirqi ugu jirto ama dambigu u hadda daddaba hacayo, toos bilayska u wac adigg garaacaya 999. Haddii kale, waxaad la xidhiidhi kartaa salghiga bilayska degaankaaga, ama la hadal la hadal sakaal bilays oo kasta.

  Qaado magcyada saraakiisha bilayska ee aad la hadashay, waxay ku siin doonaa lmabar loo gudbiyo dambiyada, oo noqon doona mid wax kuu tara haddii aad u baahato in aad kala hadasho bilayska dhacdadan mar dambe.

  Haddii aanad karayn ama aadan doonayn in aad toos bilayska ula hadasho, waxaad isticmaali kartaa u gubinta/warsiinta mashruuc qayb sedexaad oo qarsoodi ah. Tani waxay kuu ogolaanaysaa in aad dambiga ugu gudbiso mutadaac tababaran hay'ad kasta sida Golaha Qaxootiga ee Scottishka (0800 085 6087). Way kaa qoran doonaan faahfaahinta oo dhan waxaanad dooran kartaa haddii aad doonayso in u bilaysku baadho iyo in kale. Ka raadi faafaahinta xidhiidhka xarunta gudbinta agtaada websiteka Bilayska Strathclyde ee: https://www.strathclyde.police.uk/index.asp?locID=353&docID=-1

- **La xidhiidha golahaaga**

  Dawladaha hoose oo dhan waxa saran xilka ka ilaalinta bulshada taxadiyada isireed. Glasgow gudaheeda, tusaale ahaan, waxaad ka wici kartaa Hawl Wadeenada Habdhaqanka Bulshada Lidka ku ah **0800 027 3901.** YWaxaad ka eegi kartaa websiteka golahaaga degaanka faahin sidaa u gudbin lahayd taxadiyada isireed ama habdhanka lidka ku ah bulshada

- **La xariir qofka guriga iska leh ama hayada guriga ku siisay**

  Haddii aad ka kereysato golaha degaanka ama urur, waxaad u gudbin kartaa taxadiyada isiree iyaga. Waxay u leeyihiin habab/siyaasad ay wax kaga qabtaan tacadiyada noocan ah oo way kula shaqayn doonaan iyaga iyo bilayskuba si ay arrinta wax uga qabtaan. Waxaaad kala hadli kartaa xafiisyadooda ama haddii aad ku nooshahay bloog guryo badan ka kooban, konsiyeerjka "the concierge".

Haddii aad degen tahay guriyaha ku meel gaarka ah ee guri la'aanta, la xariir maamulaha keyska guri la'aanta.

Haddii u yahay xubin ka tirsan shaqaalaha ka dhibaatada sababta u ah, waxaad kala hadli kartaa qof kale oo aad ku kalsoon tahayaururka ama ka raadso talo urur sida Golaha Qaxootiga Scottishka ama Waxqab Togan Guryeynta (Positive Action in Housing;) qaxay kaa gacansiinayaan in aad go'aan ka gaadho waxaad yeeli lahayd. Waxaad ka heli doontaa lambarada tilifoonkooda dhamaadka xaashiyahan.

Haddii aad haysato dhul qabeen gaar ah oo dhibaatooyin sababaya, waxaad la hadli kartaa Golaha qaxootiga ee Scotishka ama Hawsha Toga nee Guryeynta kuwaasoo ku faraxsan in ay ku caawiyaan.

- **Kaydi waxa dhacaya:**
  - Qoraal ka samee waxa dhacay,oo u ku jiro wakhtiga, taariikh iyo meesha ay wax ka dhaceen
  - Hay qoraal kasta, waraaqayha, qoraalada ama emailada ee laguu soo direy
  - Sawir ka qaad wax alla wixii dhibaato ah ee la sameeyey
  - La hadal dadka kale (tusaale ahaan, deriska kale ama kireeyayaasha) kuwaasoo laga yaabaa in u saameeyey habdhaqanka qofka.

- **Raadi kaalmo**

  Ha u oglaadeen cadaadis isir in ay ku go'doomiyaan. Hubi in aad u sheegto qof aad aaminsan tahay.

  Waxa laga yaabaa in mar hore aad la xidhiidhay ururo degaan, sida mashruuc isku dhafan, kaas oo ku siin kara kaalmo saaxiibtinimo. Bilayska iyo golahaagu waliba way kula xidhiidhin doonaan hay'ada kuu fidin doona gargaar. Gaar ahaan, waxa laga yaabaa in aad la hadasho Kalkaaliye Dhibanaha, kaasoo ku siin kara kaalmo caadifadeed iyo mid muuqataba. Walibana way ku caawin doonaan haddii aad u baahato in aad kiiskaaga la tagto maxkamad. Waxaad ka wici kartaa 0845 603 9213 ama ka raadi macluumaad dheeraad ah websiteka Kalkaaliye Dhibanaha:

  http://www.victimsupportsco.org.uk/page/victims.cfmu

Halkee baan ka helayaa macluumaad dheeraad ah?

Kooxda Guryeynta Golaha Qaxootiga ee Scotishka

Wac lambarkan oo lagula talin doono lacag la'aan ama la samee ballan shaqaale la taliye ah: 08000856087

Hawl Togan oo Guryeyn ah

U wac lambarkan macluumaad ku saabsan adeegyada 01413532220.